

Xubinta Qaaliga ah,

Waad ku mahadsan tahay inaad xubin ka noqoto Molina Healthcare. Caafimaadka qoyskaaga ayaa anaga noo muhiim ah. Ogaysiiskan Sanadlaha ah waxa uu kaa caawin doonaa inaad barato wax badan oo ku saabsan faa'iidooyinka Apple Health (Medicaid). Waxaan rabnaa inaan habsano inaad ogtahay sida loo helo daryeelka wakhti kasta ee caawimaadkaaga jidhka iyo dhaqanka (caafimaadka maskaxda iyo isticmaalka maandooriyaha) adeegyada daawaynta, xataa mudada safmarka COVID-19. Intaa waxa dheer, waxaanu doonaynaa inaanu habsano inaad ogsoon tahay barnaamijyada iyo adeegyada lagu heli karo adiga iyagoo bilaash ah.

Molina Healthcare Waxay ku Siisaa:



Daryeelka Korono Fayraska iyo Ilaha.

- **Baadhitaanka iyo daawaynta COVID-19:** Molina waxay dabooshaa baadhitaanka iyo daawaynta. Soo wac adeeg bixiyahaaga daryeelka caafimaadka haddii aad qabto astaamaha sida qufaca iyo qandhada ama haddii uu ku gaadhay COVID-19.
- **Goobta Molina ee wax la iskaga waydiiyo korona fayraska:** Riix aykonka koonaha sare ee midig [MolinaHealthcare.com](https://www.molinahealthcare.com) websaydka si aad u eegto astaamaha oo aad u hesho jawaabo ku saabsan COVID-19.

Si aad u ogaado sida badbaadada ee daryeelka loo helo muddada safmarka COVID-19, booq [MolinaHealthcare.com/members-wacovid19](https://www.molinahealthcare.com/members-wacovid19).

- **Booqashooyinka telehealth (Baadhitaan caafimaad oo fog) la daboolo:** Molina waxay dabooshaa booqashooyinka telehealth (Baadhitaan caafimaad oo fog) ee adeeg bixiyayaashaada, xataa baadhitaanada ilmaha caafimaadka qaba! Soo wac adeeg bixiyahaaga si aad u waydiiiso wax ku saabsan booqashooyinka telehealth (Baadhitaan caafimaad oo fog).
- **Dawo qorida:** Waxaad heli kartaa ilaa 90 maalmood oo saad ah wixii ah dib u buuxinta ama dawooyinka cusub. Sidoo kale, CVS dalabka boostada farmasiigu waxa uu bixiyaa soo dirida bilaashka ah ee [caremark.com](https://www.caremark.com) ama (800) 875-0867. Fiiro dawooyinka qaar la maamulo waxay u baahan yihiin oggolaanshe hore. La hadal adeeg bixiyahaaga daryeelka caafimaadka.
- **Cuntooyinka Degdega ah:** Haddii adiga ama qof aad la nooshahay laga helay COVID-19 oo aad haysato ilo cunto oo xadidan, waxaad u qalmi doontaa barnaamijka cuntadda ku meel gaadhka ah. Soo wac Adeegyada Xubinta Molina wixii macluumaad dheeraada ah lambarka (800) 869-7165, TTY 711.



Daryeelka Degdega ah ee Onlynka ah.

Wada sheekaysiga fiidyaha ama hadalka ah ee dhakhtarka ama kalkaalisada caafimaadka ah BILAASH AH*, 24/7!

Markaad jiro dareento oo aanad arki karin adeeg bixiyahaaga koowaad ee daryeelka (PCP), isku day daryeelka rugta ee degdega ah ee onlaynka. Wax ballan ah looma baahna. Waxaa lagu arki doonaa daqiiqo gudahood.

Molina waxay ku siisaa daryeelka degdega ah ee onlaynka ah iyaddoo la adeegsanayo Teladoc!

Samayso kootadaada maanta!

- [wavirtualcare.molinahealthcare.com](https://www.wavirtualcare.molinahealthcare.com)
- Soo wac (844) 870-6821, TTY 711
- Soo dejiso abka [teladoc.com/mobile](https://www.teladoc.com/mobile)

QORAALKA MUHIIMKA AH: Waa inaad isku diiwaangelisaa Teladoc, xataa haddii aad ku biirtay daryeelka onlaynka degdega ah ee Molina xiligii hore.

*Molina waxay bixisaa daryeelka degdega ah ee onlaynka iyaddoo maraysa adeeg bixiyayaasha qandaraaska haysta. Adeegyada Daryeelka degdega ah ee onlaynka ah ee xubnaha Molina Apple Health gudaha Washington oon kharash ahayn. Qiimaha isticmaalka internatka iyo telefoonka gacanta ayaa lagu dalaci karaa.





Barnaamijka Abaal marinta Molina**

Ka hel Amazon.com Kaadhahka hadiyada ee samaynta doorashooyinka caafimaadka badan sida helida baadhitaanka fayyo qabka ilmaha, daryeelka uurka, maaraynta cudurkaaga sonkorta, iyo wax badan.

Si loo shaqaysato abaal marin:

- Mid loo qalmo oo dhammaystiran ka hortag leh & baadhitaanka fayyo qabka;
- Buuxi foomka xubinta Barnaamijka Abaal marinta Molina, oo
- Dib ugu soo dir foomka la buuxiyay Molina boostadda, fagaska, ama iimaylka.

Macluumaadka dheeraadka ah, nala soo xidhiidh:

- Booqo MolinaHealthcare.com/WA-Medicaid-Wellness
- Iimaylka MHW_QI_Interventions@MolinaHealthcare.com
- Soo wac (800) 869-7175 Ext. 141428

**Ilaa \$200 sanad kasta qofkiiba wadarta abaal marinta 12 bilood oo kasta. Abaal marinta caafimaadka way isbeddeli kartaa ogaysiis la'aan. Xayiraado ayaa la saari karaa, arag amazon.com/gc-legal.



3 Bilood Amazon Prime - Anaga ah!

Prime waxaa ka mid ah:

- Mid degdeg ah, soo diris bilaash ah in ka badan 100 sheeyo ah
- Macaamilada gaarka ah iyo lacag dhimista Xubnaha Prime
- Helida fududa ee waxyaabaha caafimaadka la xidhiidha
- Filimo toos u socda, bandhigyada Tiifiga, iyo muusiga
- Lagu daray, wax badan!

Waxaad ka heli kartaa maalin kasta waxyaabaha lama huraanka ah sida cunto caafimaad badan iyo xafaayadaha toos albaabkaaga loogu soo dirayo!

Tani waa dheefta hal wakhti ah oo loogu talo galay Molina Apple Health xubnaha dadka waa wayn ee ku nool Gobolka Washington.

Gunnada Lagu daray: Amazon hadda waxay aqbashaa kaadhkaaga SNAP EBT gudaha Gobolka Washington! Haddii aad isku darto labbadan dheefood, waxaad heli kartaa raashinka iyo alaabta kale ee lama huraanka oo laguugu keeno adiga guriga iyadodon kharash kugu joogin.

Wax badan ka baro MolinaHealthcare.com/Amazon



Abka Moobilka Molina iyo MyMolina.com.

Ka maamul daryeelkaaga caafimaadka telefoonkaaga casriga ah ama onlayn.

- Beddel adeeg bixiyahaaga
- Arag oo kaydi kaadhkaaga aqoonsiga xubinta
- Arag macluumaadkaaga caafimaadka gaarka ah wakhti kasta
- Arag qiimanahaaga, qorshaha daryeelka iyo taariikhda adeega
- Lagu daray, wax badan!

Soo dejiso abka Moobilka Molina Mobile ama soo gal MyMolina.com. Waxaa lagu heli karaa af Ingiriis iyo af Isbaanish.

Ma jiro telefoon? Dhibaato ma jirto.

Waxaad ka heli kartaa telefoonka casriga oo aan kharash kugu joogin dhexda Barnaamijkaaga Caawimada Telefoonka casriga ah***!

Molina waxay ku faanaysaa inay la shaqayso Safelink Wireless si ay u siiso xubnaha:

- Telefoonka casriga ah oo wata xogta kaydka 3GB
- 350 daqiiqo oo bile ah
- Qoraalada fariimaha oo aan xad lahayn
- Wicitaanka bilaasha ah ee Xubinta Adeegyada Molina

Booqo Safelink.com ama soo wac (800) 723-3546

***Telefoonka casriga iyo adeegyada aan waayirka lahayn waxaa bixisa Safelink Wireless si waafaqsan Barnaamijka Caawimada Lifeline, kaas oo loo heli karo shakhsiyaadka u qalma ee Apple Health.



Khadadka Talada Kalkaalisada 24-saac.

Ka hel talo caafimaad oo loo qalmo kalkaalisada 24/7.

(888) 275-8750, TTY 711





Barnaamijka Horumarinta Tayada. Haddii aad jeclaan lahayd inaad barato wax badan oo ku saabsan Horumarinta Tayada (QI) barnaamijyada iyo hawlaha Molina, booqo MolinaHealthcare.com/WAQIProgram.

Barnaamijka QI:

- Hubiyaa in aad hesho koox daryeel caafimaad oo aqoon leh
- Dib u eegaa oo tallaabona qaadayaa haddii ay jirto arrin dhanka daryeel tayo leh kaasi oo adiga laguu fidyay
- Ka jawaabaa oo waxna ka qabanayaa baahiyaha dhanka dhaqanka iyo luuqadaha ee kala duwan ee xubnaheenna
- Kor u qaadayaa badqabka dhanka daryeelka caafimaad iyadoo loo marayo wax baridda xubnaheenna iyo adeeg bixiyayaasheena
- Waxa uu ku qiimeeyaa tayada daryeelka caafimaadka dhexda HEDIS®
- Waxa uu ka warhayaa qanaca xubnaha dhexda xog ururinta CAHPS®
- Waxa uu bixiyaa tilmaamaha iyo ilaha si caafimaad qab loogu joogo:
 - [Hagitaanka Kor oo Caafimaad ku Joog](#). Si looga caawiyo xubnaha inay gartaan waxa adeegyada loo baahan yahay yihiin iyo goorta.
 - [Hagida Helida Daryeelka Caafimaadka tayada leh](#). Si loo caawiyo xubnaha inay helaan barnaamijyadayada iyo adeegyada.



Barnaamijyada Caafimaadka iyo Adeegyada.

Ka masuul ahow caafimaadka adeegyadan iyo barnaamijyada sidii qayb qorshahaaga daboolida caafimaadka:

- Baadhitaanada fayd qabka ilmaha iyo tallaalada
- Hooyanimada iyo daryeelka ilmaha dhasha
- Barnaamijyada sigaar cabida iyo xakaymaynta miisaanka
- Taageerada maaraynta daryeelka ee xaaladaha raaga sida xiiqda, cudurka sonkorta iyo xaaladaha wadnaha. Lagu daray, caawimada si loo caawiyo in la isku duba rido ballamaha adeeg bixiyahaaga.



Jidka Hagaha Fayd qabka iyo Warsidaha Xubinta. Miyaad og tahay in Molina ay leedahay xubinta macluumaadka sida caafimaad qab loogu joogo oo loo daryeelo xaaladaha caafimaadka raaga markaas waxaad si buuxda u xiisayn kartaa noloshada?

Tilmaamaha Isha:

- [Jidka Hagaha Fayd Qabka](#)
- [Xubinta Caafimaadka iyo Warsidaha Fayd qabka](#)
- [Tilmaamaha Caafimaad qab ku joogida fayd qabka guud iyo sida loo daryeelo xaaladaha caafimaad ee raaga sida xiiqda, cudurka sonkorta, cudurka sambabka iyo cudurka wadnaha](#)



Adeegyada Dhibta Dhibta caafimaadka maskaxda waa daqiiqada marka qof dhaqankiisa ay nafahooda iyo kuwa kaleba khatar gelin karaan, gaar ahaan haddii aanay caawimo helin.

Haddii adiga ama qof aad garanayso uu la dhibtoonayo arrimaha la xidhiidha caafimaadka maskaxda, isticmaalka maandooriyaha ama khamaarka, caawimada waxaa la heli karaa 24/7. Turjumaadaha luqada waxaa la heli karaa, sidoo kale!

- Booqo [Laynka Caawimada Bogsashada Washington](#) lambarka: (866) 789-1511 TTY (206) 461-3219
- Macluumaadka dheeraadka ah, booqo MolinaHealthcare.com/IMC-Crisis
- Wixii gurmada ah, wac 911



Su'aallo? Booqo [MolinaHealthcare.com](https://www.MolinaHealthcare.com) ama soo wac Adeegyada Xubinta lambarka (800) 869-7165, TTY 711.

Si lagaaga caawiyo inaad nala hadasho, Molina waxay bixisaa adeegyada turjumaada, ay ku jiraan qoraalada farta waa wayn, qoraalada qoran ee luqadaada loo turjumay, maqal duuban, qaababka korontada la heli karo, iyo Farta qoraalka ee Indhoolaha.

Halkan waxaa ah macluumaad ku saabsan sida loo helo daryeelka caafimaadkaaga maskaxda iyo dhaqanka:

1. **Soo wac PCP gaaga iyo Adeeg bixiyaha Caafimaadka dhaqanka**

PCP waxay u taagan tahay Primary Care Provider (Adeeg bixiyaha Daryeelka Koowaad). Isaga ama iyada waa adeeg bixiyahaaga gaarka ah. PCP gaaga waxa uu dawayn doonaa badanka baahiyahaaga daryeelka caafimaadka caadiga ah, dib u eegayaa baadhitaanadaada iyo natiijooyinka, kuu qoraa dawooyin, oo kuu gudbiyaa adeeg bixiyayaasha kale (dhakhtarada takhasuska leh), haddii loo baahdo.

Adeeg bixiyahaaga daryeelka caafimaadka dhaqan waxa uu daryeeli doonaa caafimaadkaaga maskaxda takhasuseed iyo/ama dawooyinkaja iyo baahiyaha daawaynta caafimada. Haddii aad la kulmayso dhibta caafimaadka maskaxda soo wac laynkaaga dhibta maxaliga ah, booqo [MolinaHealthcare.com/IMC-Crisis](https://www.MolinaHealthcare.com/IMC-Crisis). Wixii gurmada ah, soo wac 911.

Haddii aanad haysan adeeg bixiya oo ad jeclaan lahayd inaad hesho mid ama haddii aad u baahan tahay inaad hesho farmasii adiga kuu dhow, booqo [MolinaHealthcare.com/ProviderSearch](https://www.MolinaHealthcare.com/ProviderSearch). Si loo beddelo PCP gaaga ama haddii aad qabto su'aalo ku saabsan dawooyinkaaga qoran, soo wac Xubinta Adeegyada (800) 869-7165, TTY 711.

Si loo arko liiska wakaaladaha qandaraaska ku haysta iyo xarumaha bulshadda caafimaadka ee bixiya adeegyada caafimaadka dhaqanka aagaaga, booqo [MolinaHealthcare.com/WABHProvider](https://www.MolinaHealthcare.com/WABHProvider).

2. **La hadal wakiilka Molina**

Wakiiladayada Xubinta Adeegyada waxay ka jawaabi karaan su'aalaha ku saabsan qorshahaaga ama daboolida dawada, waxay ku siisaa adiga macluumaadka caafimaadka, caawimada aad ka hesho adeeg bixiyaha iyo wax badan oo dheeraad ah!

Si loo codsado macluumaadka oo ku qoran luqad kale, qaab ka duwan, ama si loo helo macluumaad ku saabsan dheefahaaga soo wac **Adeegyada Xubinta:** (800) 869-7165, TTY 711, Isniinta ilaa Jimcaha laga bilaabo 7:30 subaxnimo ilaa 6:30 fidnimo (PST).

Haddii aad soo waco saacahada shaqada ka dib, waxaad u dhaaftaa fariin oo dib ayaanu kuu soo waci doonaa maalinta shaqada ee ku xigta.

Si loo waydiiyo su'aalo ku saabsan u qalmidaada Apple Health ama si caawimo looga helo dib u cusboonaysiinta xidhiidhka daboolida caafimaadka:

- Adeega Macliinka ee Masuuliyiinta Daryeelka Caafimaadka Gobolka Washington (800) 562-3022, TRS 711
- Washington Healthplanfinder lambarka (855) 923-4633, TTY 711 ama booqo [wahealthplanfinder.org](https://www.wahealthplanfinder.org)

Haddii aad hayso su'aalo gaar ahaan la xidhiidha dheefaha xubinta Molina, fadlan soo wac **Molina Xarunteeda Wicitaanka Wacyi gelinta** lambarka (800) 294-8620, TTY 711.

Ka baro wax badan oo ku saabsan dheefahaaga [MolinaHealthcare.com](https://www.MolinaHealthcare.com).

3. **Ka akhri Dhokumentiga Muhiimka ah**

Akhri **Ogaysiiska Dhaqamada Gaar ahaanshaha**.

Buug yarahaaga xubinta waxaa laga heli kara [MolinaHealthcare.com/IMCHandbook](https://www.MolinaHealthcare.com/IMCHandbook).

Waydiiso nuqulka warqadda ee dukumeentiga addoo soo wacaya Adeegyada Xubinta lambarka (800) 869-7165, TTY 711.

Buug yarahaaga xubinta adeegu waxa uu wax kaaga sheega:

- Dheefaha la daboolo iyo kuwa aan la daboolin
- Sida loo helo adeegyada caafimaadka maskaxda
- Sida loo helo dawada iyo adeegyada daawaynta khamrada
- Waxa la samaynayo haddii aad biil hesho
- Sida loo helo caawimo haddii aad ku hadasho luqad aan Ingiriisiga ahayn ama haddii aad u baahato inaad hesho wada xidhiidhka ku qoran qaab ka duwan sida maqalka, qaababka la soo heli karo ee korontada ah, ama qoraalka Indhoolaha
- Sida loo helo xaqiiqooyinka ku saabsna adeeg bixiyayaasha (cida lala xidhiidhaya Molina)
- Sida loo helo takhasuska, caafimaadka maskaxda iyo daryeelka caafimaadka
- Sida looga hadlo cabashada
- Sida Molina ay dib ugu eegto teknoolajiga cusub
- Dardaaranka hore loo sii qoro ee daryeelka kaas oo ugu sii qora doorasooyinkaaga daryeelka caafimaadka ee jidhka iyo caafimaadka maskaxda qoraal ahaan adeeg bixiyahaaga iyo qoyska
- Adeegyada la heli karo si loo maareeyo xaaladaha caafimaad ee raaga
- Barnaamijka Horumarka Tayada Molina
- Dheefahaaga dawo qorida
- Dheefaha aaga ka baxsan iyo sida loo helo daryeelka
- Sida loo helo liiska tilmaanta adeeg bixiyaha
- Sida loo helo daryeelka koowaad
- Sida loo helo gurmada, saacadaha shaqada ka dib iyo daryeelka aaga ka baxsan
- Sida rafcaan looga qaato waxa ku saabsan dheefahaaga
- Sida iyo goorta la helayo adeegyada maaraynta xaalada caafimaad
- Sida Molina ay kharashka u siiso adeeg bixiyayaasha
- Sida looga warbixiyo daryeelka caafimaadka khiyaamada ah, khasaaraha iyo xad gudubka
- Xuquuqaha Xubinta iyo Masuuliyadaha

Macluumaadka dheeraadka ah ee ku saabsan dheefahaaga iyo ilaha ay Molina bixiso, fadlan booqo [MolinaHealthcare.com](https://www.MolinaHealthcare.com).

Waad ku mahad sanatahay inaad noqoto xubinta Molina. Waxaanu aadu rajaynaynaa inaanu u adeegno baahiyaha daryeelkaaga caafimaadka.

Kii daacada kuu ahaa,

Qoyskaaga Molina